

# Ka Caawinta Aaska Dadka u dhintay Korona fayras

Cudurka safmarka COVID-19 wuxuu qoysas badan u keenay murugo aad u tiro badan. FEMA, hadafkeenu waa inaan caawino dadka horaan, inta lagu jiro iyo ka dib afooyinka. Waxaan u heellan nahay inaan gacan ka geysano yareynta culeyska dhaqaale iyo culeyska uu viruska sababay.

**FEMA waxay siineysaa gargaar lacageed qarashka aaska ee laxiriira COVID-19 ee dhacay wixii ka dambeeyay Janaayo 20, 2020.**



## Si aad xaq ugu yeelatid kaalmada aaska, waa inaad buuxisaa shuruudahan:

- Dhimashadu waa inay ka dhacday Mareykanka, oo ay ku jiraan dhulalka Mareykanka, iyo Degmada Kolombiya.
- Shahaadada dhimashada waa inay muujisaa in dhimashadu loo aaneeyay ama sababay caabuqa COVID-19.
- Codsaduhu waa inuu noqdaa muwaadin Mareykan ah, qof wadanka ku dhashay ama shisheeye aqoonsi haystaa galayna kharashka aaska wixii ka dambeeyay Janaayo 20, 2020.
- Ma jiraan wax shuruud ah oo loogu talagalay qofka dhintay inuu ahaado muwaadin Mareykan ah, qof wadanka ku dhashay ama shisheeye aqoonsi

## Waa kuwee kharashyada u qalmi doona magdhowga?

Tusaalooyinka kharashyada u-qalma ee loogu talagalay adeegyada xabaasha ama gubida meydka ayaa ka mid noqon kara, laakiin aan ku xaddidnayn:

- Kharashka gaadiidka ilaa laba qof si loo aqoonsado qofka dhintay
- Wareejinta hadhaaga, sanduuqa maydka lagaliyo ama weelka lagu kaydiyo danbaska maydka la gubay
- Goob aaska ama goobta danbaska maydka la gubay la dhigo
- Kharashka gubida ama xabaalida meydka
- Calaamada lagu qoro xabaasha fidsan ama dhagaxa la istaajiyo xabaalaha
- Adeegyada wadaadada ama hawlwadeennada
- Qabanqaabada xafladda aaska
- Adeegsiga qalabka guryaha aaska ama shaqaalaha
- Kharashyada laxiriirta soo saarida shahaadooyin badan oo dhimasho ah

## Macluumaadkee ayaan ubaahanahay inaan siiyo FEMA?

Fadlan hayso macluumaadka soo socda ka hor intaadan la xirii FEMA si aad u codsato:

- Magacaaga, lambarkaaga sooshiyaal sekuuritiga, taariikhdaada dhalashada, cinwaankaaga boosta iyo lambarrada taleefan ee lagaala soo xiriiri karo.
- Magaca, lambarka soshal sekuuritiga iyo taariikhda dhalashada shaqsi kasta oo dhintey.
- Goobta ama cinwaanka uu ku dhintay shakhsiga dhintay.
- Dukumiintiyada iyo rasiidhada wixii caawimaad ah ee horey looga helay ilo kale, oo ay kujiraan caymiska
- xabaasha ama aaska, tabarucaadka, wakaaladaha tabaruca, barnaamijyada kale ee dowladda ama ururada aan macaash doonka ahayn.
- Haddii adiga iyo qof kale labadiinuba aad wada gasheen kharashaadka aaska ee isla shakhsiga dhintay, sidoo kale waxaad ku siin kartaa qofkaas isla codsadahaas — ku dar magacooda, lambarkooda sooshal sekuuritiga iyo taariikhda dhalashada markaa arjiga xaraynayso.

## SIDEEN U CODSADAA KAALMADAN?

**Ka wac Khadka Caawinta COVID-19 ee FEMA**

1-844-684-6333

(TTY: 800-462-7585)

laga bilaabo 9 a.m. ilaa 9 p.m.

ET, Isniinta - Jimcaha oo bilow nidaamka hawsha.

**Adeegga ugu dhakhsaha badan ee la socda dalabkaaga, waxaad ku bilaabi kartaa ku gudbinta dukumiintiyada onlayn adoo isticmaalaya**

[Disasterassistance.gov](https://www.disasterassistance.gov).

**fakis ahaan 855-261-3452.**

Dukumintiyada sidoo kale waxaa laguugu soo diri karaa boostada:

## SU'AALAHADA BADA LA IS-WEYDIIYO

**Waxaad sidoo kale nagu soo booqan**

**kartaa onlayn [FEMA.gov/funeral-assistance/faq](https://www.fema.gov/funeral-assistance/faq).** Macluumaadka

waxaa lagu bixiyaa dhowr luqadood oo taleefan iyo websaydh ah.

Ka Caawinta Aaska Dadka u dhintay COVID-19

P.O. Box 10001

Hyattsville, MD 20782



**FEMA**